Shacabku Wuxuu Doonayaa Shareecada

Halgan.net

Muftiga Liibiya Dr.Saadiq Al-Qaryaani ayaa u sheegay shacabka Liibiya inay xaaraan tahay in loo codeeyo madaxweyne diidan shareecada. Culimo Azhariyiina ayaa iyaguna soo saaray fataawooyin ay ku xarimeen in madaxnimada loo doorto madaxweyne xayiraya shareecada Islaamka. Dr.Cabdul Fataax Idriis oo ah madaxa qaybta fiqiga muqaaranka ee Jaamicada Al-Azhar ayaa yidhi: (Sifooyinka waliyo amarka waxa ugu muhiimsan inuu sharciga Allaah ku fuliyo dhinac walba, sida maamulka arrimaha dadweynaha, cilaaqada dowlada uu madaxda ka yahay la leedahay dowladaha kale, dhinaca mucaahadooyinka iyo balamaha caalamiga ee uu galayo ee uu aqbalayo isagoo madax u ah dowlad Islaamiya, iyo dhinaca nidaamka uu ku dhaqayo dowlada gudaheeda oo iyana loo baahan yahay inuu ilaaliyo shareecada Allaah subxaanuhu wa tacaalaa).

Dr.CabdulMucdi Biyoomi oo xubin ka ah *Majmac Al-Buxuus Al-Islaamiya* ayaa isna yidhi:(waxa la og yahay in masuuliyada ugu horaysa ee madaxa dowlad walba oo Islaamiyi tahay **ilaalinta diinta iyo fulinta shareecada Islaamka,** si loo ilaaliyo danaha dadweynaha, loona oogo cadaalada).

Gudoomiyaha ururka Xisbulaahi oo lagaga dhawaaqay Soomaaliland Sheekh Maxamuud Cabdillaahi Geele, ayaa yidhi isagoo sharxaya ujeedooyinka ururkiisa: “ Waxaanu si cad ugu baaqaynaa in ummadda lagu dhaqo shareecada, dastuurkeenuna waa samaawi Ilaahay inoo soo dejiyey, qofka Muslinka ahi inuu sharci iyo dastuur kale qaato uma banaana”.[dowlada Somaliland wey mamnuucday ururka Xisbulaahi, laakiin gudoomiyaha ururka iyo taageerayaashiisu kama tanaasulin doonistooda ku wajahan shareecada].

Qadiyada shareecadu waxay noqotay madlab iyo doonis jamaahiiriya oo dunida Islaamka saaqday mashriq iyo maqriba, waxay gaadhay heer aan cododka ku baaqaya la cabudhin karin, waxa laga soo gudbay waqtiyadii Sayid Qutub qudha looga gooyey inuu ku baaqay in xukunka Allaah la qaato, Isaguna (سبحانه وتعالى) keligii iska leeyahay *Al-xaakimiyah* (الحاكمية), lama joogo waqtigii CabdulQaadir Coodah oo ahaa qoraagii buugga (التشريع الجنائي الإسلامي) xadhiga daldalaada qoorta loo sudhay. Waa laga soo gudbay iyana maalmihii taliskii Shuuciga ee Soomaaliya dharaar cad toogtay culimadii Soomaaliyeed ee diiday xeerkii qoyska ee lagu diidanaa shareecada Rabi (سبحانه وتعالى). [Fiiro: Waxa la odhan karaa xubnihii Golihii Sare ee Kacaanka ,xafiiskii Siyaasada iyo garsoorayaashii Maxkamaddii Badbaadada Qaranka oo ah raga loo haysto dilkii culimadaasi waxay ka soo jeedeen qabiilooyinka Soomaalida ee kala duwan]. Wey dhamaadeen maalmihii Anwar Saadaat ugu hanjabay Sheekh Axmed Al-maxalaawi ooynu odhan karno wuxuu ahaa suldaanka culimada ee waqtigan (سلطان العلماء في عصرنا), in jeelka loogu tuuri doono sidii eey oo kale, hadalkaasi oo uu ku yidhi lahjada Masaaridu wuxuu ahaa:

(الرجل بتاع الإسكندرية.. الخطيب اللي كان بينال مني.. ومن بيتي.. أهو مرمي في السجن زي الكلب)

Hadalkaa foosha xun ayuu Saadaad ku yidhi Sheekha khudbadii caanka ahayd ee uu akhriyey Sebtember/5/1981. Wuxuu Ilaahay (سبحانه وتعالى) ii qadaray inaan khudbadaa uu ugu hanjbayey islaamiyiinta si toosa uga dhegeysto raadiyaha habeenkii uu ka jeediyey *majlisul shacab*, waqtigaasi oon joogay Hargeysa. Waxa kale oo Ilaahay (سبحانه وتعالى) igu sharfay inaan Sheekha kula kulmay Maraykanka dabyaaqadii sideetanaadkii, wuxuu nooga sheekeeyey maalmihii adkaa ee uu jeelka ku soo qaatay. Waxaan hadaladiisii ka xusuustaa inuu mar aanu weydiinay sidee adigoo da' ah ugu adkaysatay cadaabka iyo jidh dilka uu yidhi " *yaa ibnii*, waa inta hore oo keliya", *subxaanalaah*, Ilaahay ayaa awliyadiisa xaqa u taagan siinaya madad iyo taageero, yaa Allaah adaa Qaadiree na sug waxa lagu jiraa waqti fitnee. Wuxuu Sheekhu Ilaahay ha cizeeyee hadalka noogu daray inuu yidhi: dhibta iigu weyn een jeelka kala kulmay waxay ahayd inay igu adkayd inaan u adkaysto qaylada ka soo yeedhaysay dhalinyarada islaamiyiinta ah ee lagu jidh dilayey qolalka u dhawaa qolkaan ku xidhnaa!! Ilaahayna waa Caadil oo ma simayo nin daalina iyo nin daacada, aduunka waa laga wada socon doonaa oo aakhiro ayaa Ilaahay hortiisa laysku xisaabi doonaa, dadka wax isku haystana Ilaahay ayaa kulmin (وعند الله تجتمع الخصوم). Waa run oo Ilaahay (سبحانه وتعالى) ayaa la wada hortagi, qof walbaana wuxuu heli wuxuu galabsaday.

Hadaba, geediga shareeco doonku waa dabayl caafimaad oon la joojin karayn, laysna hortaagi karayn, waa mowjad xawaare ku socota oo ciddii ka hortimaadaba, Ilaahay idankii, badda ku daraysa, waayo wuxuu ka tarjumayaa doonis adag oon liicsan lahayn, wuxuu xambaarsan yahay qadiyad caadila oon gorgortan aqbalayn. Waxay Muslimiintu garteen in isku xukunka shareecadu waajib ku yahay, in qof walba laga rabo inuu raadiyo xukunka shareecada, isaguna isku xukumo si looga takhaluso qawaaniinta kufriga ee Muslimiinta ka fogaysay shareecada iyo xukunka diinta.

Canaawiinta wararka iyo akhbaarta waxaa ku badan warar tilmaamaya heerka uu marayo rabitaanka iyo doonista ay dadweynaha Muslinku ku muujinayaan sida laxaadka leh eey u dalbayaan xukunka shareecada. Bal adba isha mari canaawiintan ku soo baxday saxaafada lagu qoro afka Carabiga.

مظاهره بباكستان تطالب بتطبيق الشريعة/تظاهرات في تونس للمطالبة بتطبيق الشريعة الإسلامية/داعية كويتي يدعو لإلغاء الدستور وتطبيق الشريعة/ العودة للشريعة وإقصاء القوانين الوضعية شرط لوحدة الأمة الإسلامية/ العلمانيون والشريعة المجهولة/ دعوة المصريين ... لتطبيق شرع رب العالمين/ د. العمر يوصي الإسلاميين بتطبيق شرع الله/ يعني إيه تطبيق الشريعة؟ لمواجهة حملات التخويف/ ملاحظات حول المظاهرة المليونية الداعية إلى تطبيق الشريعة/ هل تطبيق الشريعة تجربة تبوء بالفشل؟/ علماء أزهريون: الحاكم الذي يُهمل الشريعة لا يجوز انتخابُه/ سلفيو تونس ومعركة تطبيق الشريعة.

Shaki kuma jiro inay cirka isku shareertay doonista Muslimiinta ee ku wajahan ku dhaqanka shareecada, arinkaasina waa mid loo baahan yahay in laga shaqeeyo sidii loo fal gelin lahaa, oo doonistaa looga dhigi lahaa doonis diiniya oo ku salaysan ictiqaad aan la bedeli karayn, oon

ahayn mid ka soo dhex butaacaysa xamaasad iyo caadifad waqtiyeysan oo keliya ama mid ku ladhan xizbi iyo ashkhaas gooniya. Qadiyada shareecadu waa inay ka gudubto inay ku koobnaato kooxo, xizbiyo iyo dad gaara, waa inay noqoto mowqif caqiidiya ooy ka midaysan yihiin Muslimiintu, waa inay noqoto ujeedo iyo hadaf ay wada higsanayaan shucuubta dunida Islaamku, waa inay gaadho heer ay dhaliso rabitaan shacbiya oon lays hortaagi karayn, marnabana aqbalyn tanaazul iyo gorgortan.

Codka Islaamigi (الخطاب الإسلامي) waa inuu awood u yeesho siduu qadiyadan u gaadhsiin lahaa quluubta Muslimiinta meel walba ay joogaan isagoon ku kala soocayn heerkooda waxbarasho, dhaqaale iwm. Islamarkaana waa inuu ka gudbo soohdimaha juqraafiga ah ee lagu kala qaybiyey dhulka Muslinka iyo xuduud dhaqameedka caqabada ku ah midaynta cododka shareecada.

Abuurka iyo dhisida cod dadweyne oo leh baaxad iyo qoto dheerid ayaa maanta ah waajib sharciya iyo baahi waaqiciya oo haddii loo hagar bixi waayo inagu keenaysa fashal iyo dibu gurasho. Baaxada iyo qoto dheerida aynu higsanaynaa waxay imanaysaa oo keliya haddii la baahiyo wacyi caqiidiya oo ku wajahan ahmiyada shareecada iyo meesha ay kaga jirto caqiidada iyo diinta Islaamka.

Ummadda Islaamku waxay maanta ku jirtaa waqti kala guura oo taariikhiya, waqtigana waxa loo baahan yahay in dadweynaha Muslinku si weyn isku garab taago shareecada Rabigooda, iyagoo xusuusan waajibka ka saaran diintooda iyo mowqifka laga filayo inuu qof walba oo Muslini ka qaato ololaha shareeco diidka ah ee ay hor kacayaan calmaaniyiinta iyo libiraaliyiintu.

Waxa muhiima in Muslimiintu fahmaan in ku dhaqanka shareecadu suuro gal ahayn haddii aan la helin dowlad masuuliyad iska saaraysa ilaalinta iyo fulinta axkaamta diinta. Dowladaasi ooy culimadu si weyn uga qayb qaadanayaan taladeeda iyo toosinteeda, culimaduna waa inay ku baraarugaan doorka weyn ee ka saaran falgalinta iyo camalaynta qadiyada shareecada.

Wacyigelinta Dadweynaha:

Calmaaniyiinta iyo cadowga Shareecadu waxay ku hawlan yihiin inay dadweynaha ku cabsiiyaan in xukunka shareecadu khatar ku yahay dadka iyo duunyadaba, in ku dhaqanka shareecadu keenayo amni xumo, burbur dhaqaale iyo dhismaha dowladeed oo meesha ka baxa. Waxay shareecada ka bixiyaan sharax beena oo odhanaya shareecadu waxay dulmaysaa dumarka, waxay kalifaysaa in shacabka badhkii gacmaha iyo lugaha laga jaro iwm, oo ka mida dacaayada beenta ah ee calmaaniyiintu ka faafiyaan xukunka shareecada.

Sidaa awgeed waa in dadaal badan la geliyo sidii looga hortagi lahaa dacaayadooda iyo beentooda, waa in dadka loo sharxo mafhuumka shareecada iyo qaabka loo dhaqan gelinayo.

Dad badan oo diidan fulinta shareecada ayaa hadday ogaadaan macnaha dhabta ah ee shareecada bedeli doona ra’yiga ay ka haystaan xukunka shareecada, isna garab taagi doona qadiyadda shareecada.

Calmaaniyiintu ma ogola Shareecada iyo xukunka Qur'aanka iyo sunnaha. Waa loolan aan aqbalayn gorgortan iyo wada hadal midna, arrinku waa diin iyo diin la'aan, qadiyaduna waa shareecada Rabi iyo qaanuunka shaydaanka ood midkood is garab taagto, ee naftaada maanta u dooro mawqifka ay diintaadu ku badbaadayso, kuna helaysid liibaanta aakhiro.

Wacyi galintaasi waa inay taabato arimaha soo socda:

1. In xoog la saaro aayadaha iyo axaadiista waajibinaya isku xukunka shareecada, iyadoo lagu sharxayo duruus iskugu jirta qoraallo, maqal iyo muuqaalba.

2. In la faafiyo buugaagta ay culimadu kaga hadleen qadiyada shareecada, waajibnimadeeda iyo inay xaaraan tahay in laysku xukumo qawaaniinta kufriga. Wey badan yihiin buugtaasi waxaanse tusaale ahaan u sheegayaa risaalad mawduuceega muhiim ku ah oo uu qoray Sheekh Maxamed bin Ibraahiim lana yidhaa (تحكيم القوانين), waxaan ku dhiiri galinayaa ardayda cilmiga inay akhristaan risaaladan, waxana sharax waafiya ka bixiyay risaaladan Dr.Safar Al-Xawali, Ilaahay ha caafiyee. Risaalaadu inkasta ooy gaaban tahay haddana wuxuu Sheekhu si cimiyaysan u falanqeeyay

Fiiro: Iska jir inaad ku daganto ama lagugu suldaaro dacaayada kooxaha qaarkood ka faafiyaan risaaladan oo ah inay yidhaahdaan Sh.maxamed bin Ibraahiim intii aanu dhiman ka hor ayuu ka noqday dulucda iyo axkaamta uu ku dawinay risaaladiisa. Sheekadaasi waa been mana dhicin, Sheekhuna wuxuu geeriyooday isagoon waxba ka bedelin muxtawaha risaaladiisa sida uu cadeeyay Sheekh Ibnu Jibriin oo arday u ahaa Sh maxamed, labadaba Alle ha naxariistee.

3.In la nooleeyo fataawooyinkii ay culimadii hore ka yidhaahdeen waajibnimada xukunka shareecada iyo baadilnimada qaanuunka kufriga, khaasatan culimadii la kulantay ama ka hadashay dhacdadii Tataarka iyo qaanuunkii *ilyaasiq* ee Jankiis khan, sida Sheekhul Islaam ibnu Taymiye, Al-xaafid Ibnu Qayim iyo Al-xaafid ibnu Kasiir. Waayo xaalka qawaaniinta wadciga ah ee maanta ayaa aad u shabaha qaanuunkii Jankiis Khaan dejistay, fataawooyinka ay culimadaasi ka sheegeen dhacdadaasina waxay wax badan ka ifinaysaa xaqiiqada dhabta ah ee ku wajahan xukunka sharciga ee ku saabsan ciddii sharciga Ilaahay ee laysku ijmaacay ku bedesha sharciyo kufriya oo khilaafsan sharcigiisa iyo diintiisa.

Midnimada Muslimiinta iyo Shareecada:

Aafooyinkii laga dhaxlay gumaysiga waxa ugu halis badnaa in ummadda Islaamka lagu xukumay qawaaniin kala duwan oo wadciya, qaanuunka Faransiiska ayaa lagu xukumay Masar, Liibiya, AlJeeriya, Maqrib iyo Lubnaan. Qaanuunka Ingiriiska ayaa isagana lagu xukumay Suudaan, Ciraaq iyo Urdun. Soomaalideena waxa lagu riday xaalad gooniya oo ahayd in layskugu daray qaanuunka Ingiriiska iyo ka Talyaaniga.

Qawaaniintaasi waxay ummaadda ku keentay khilaaf iyo tafaraaruq adhaxda ka wreemay, khatarna galiyay hawiyadeedii iyo astaanteedii ummadnimo. Tafaraaruqaa ku aadanaa dasaatiirta

iyo qawaaniinta lagu xukumay siyaasada, dhaqaalaha, manaahijta waxbarashada iyo bulshada waxa garab socotay khatar kale oo Muslimiinta lagu kala qaybiyay, taasina waxay ahayd soohdimaha ama xuduuda uu gumaysiga Galbeedku ku kala qaybiyay Muslimiinta.

Midnimada Muslimiintu waxay ku imanaysaa oo la helayaa iyadoo lagu midoobo caqiidada iyo shareecada Islaamka oo nolosha lagu hago axkaamta diinta.

Sheekhul Islaam ayaa yidhi isagoo qeexaya in haddii laysku xukumo waxaan ahayn xukunka Ilaahay uu Muslimiinta ka dhex dhacayo khilaaf iyo colaadi:

(وإذا خرج ولاة الأمور عن هذا؛ فقد حكموا بغير ما أنزل الله، ووقع بأسهم بينهم؛ قال النبي صلى الله عليه وسلم: ((ما حكم قوم بغير ما أنزل الله؛ إلا وقع بأسهم بينهم)) .وهذا من أعظم أسباب تغيُّر الدول؛ كما قد جرى مثل هذا مرة بعد مرة في زماننا وغير زماننا. ومن أراد الله سعادته؛ جعله يعتبر بما أصاب غيره، فيسلك مسلك من أيَّده الله ونصره، ويجتنب مسلك من خذله الله وأهانه)؛ فإن الله يقول في كتابه:{ وَلَيَنصُرَنَّ اللَّهُ مَن يَنصُرُهُ إِنَّ اللَّهَ لَقَوِيٌّ عَزِيزٌ الَّذِينَ إِن مَّكَّنَّاهُمْ فِي الأَرْضِ أَقَامُوا الصَّلاةَ وَآتَوُا الزَّكَاةَ وَأَمَرُوا بِالْمَعْرُوفِ وَنَهَوْا عَنِ الْمُنكَرِ وَلِلَّهِ عَاقِبَةُ الأُمُورِ}).[الفتاوى:388/35].

“Haddii ay xukaamtku ka baxaan arinkaasi, waxay wax ku xukumeen wax aan ahayn wixii Ilaahay soo dejiyey, dhexdoodana waxa ka dhaca dhib; Nabiga (صلى الله عليه وسلم) ayaa yidhi: (qoomkii wax ku xukuma wax ka duwan waxa Ilaahay soo dejiyey waxa dhexdooda ka dhaca dhib). Taasina waxay ka mid tahay sababaha ugu waaweyn ee keena isbedelka dowladaha, sida marar badanba dhacday waqtigeena iyo waqtiyo kaleba. Qofkii uu Ilaahay la doono liibaana wuxuu waafajiyaa inuu ku cibro qaato wixii qayrkii ku dhacay, markaasuu raacaa jidka kuwa Ilaahay taageeray una nusreeyey, wuxuuna ka fogaadaa jidka kuwa Ilaahay hoojiyey ee duleeyey”. Ilaahay wuxuu ku yidhi Kitaabkiisa: [Xaqiiqadii Alle wuu u gargaari ciddii u gargaarta (diintiisa), Allena waa Xoog Badane Adkaade ah. Waana kuwa haddaanu makanino dhulka ooga salaada oo bixiya sakada oo fara wanaaga oo reeba xumaanta, Allaana iska leh cidhibta arimaha]”.

Dhibtaasi uu Nabigu (صلى الله عليه وسلم) yidhi waxay ka dhex dhacaysaa dadkii isku xukuma wax khilaafsan xukunka Rabi waxay culimadu ku qeexeen inay tahay in laysku salidayo, colaadina ka dhex dhacayso. Bal eeg xaalka Muslimiinta, kuwa dal dal isku dilaya, kuwa qabiil qabiil iyo reer reer isku madhiyey iyo kuwa aduunyo iyo maal awgii isku gumaadaya!! Maxaa u diiday inay arkaan sababta asaaska u ah colaada iyo dagaalada dhiigu ku daatay, xoolaha lagu khasaariyey, reeruhu ku baaba’een, qaxootigana lagu noqday?

Bal inay dix-dhagaxeed yihiin kuwa shareecada diidani, maxay u colaadinayaan shareecada Rabigood? Maxay u kala saarayaan diinta iyo siyaasadda? Maxay u kala soocayaan masaajidka iyo dowlada? Maxay qaanuunka kufriga ugu doorsanayaan shareecada Islaamka?

Culimada iyo ducaada Islaamku way ku xiiqeen inay sheegaan, bayaamiyaan ooy caddeeyaan in ku dhaqanka shareecadu xal waara u yahay mashaakilkeena murugsan ee uu ka midka yahay is khilaafka iyo colaadaha ku salaysan qabiilka, soohdimaha gumaysigii jeexay iyo arimaha kale ee hurinaya colaadaha ay la saldhigi kari la'dahay meelo badan oo ka mida dunida Islaamku.

Islaamiyiinta:

Ikhwaanii aynu ogaano inaynu nahay ducaad xambaarsan risaaladii Islaamka, sidaa awgeed waxa laynooga baahan yahay in aynu risaalada Islaamka iyo qadiyada shareecada u soo bandhigo qaab iyo hanaan ka madhan kana hufan cawaadifteena, dareenkeena gaarka ah, cadaawado iyo colaado aynu u qabno dad ama jihooyin gaara ooynu isku khilaafsan nahay ra'yiga iyo aragtida ku salaysan *ijtihaadka*, iskana jirno in cadho iyo aargoosi inagu kalifaan inaynu shareecada hareer marino dariiqadeeda saxa ah.

Ha ogaadaan jamaacooyinka iyo kooxaha Islaamiyiinti in dunida Islaamka dhexdeeda ay ka falgalayaan, si xoogana uga unkamayaan codad iyo tayaaraad shareeco doona oon ka amar qaadan kuna xidhneen tandiimyadii hore u soo jiray, balse ay matalayaan dareen iyo doonis shacbiya oo ku wajhan rabitaanka shareecada Ilaahay.

Daahirada musharaxa madaxnimada dalka Masar Dr.Xaazim Salaax Abuu Ismaaciil (Ilaahay guusha ha siiyee) ayaa ah muqaal iyo dhacdo u baahan diraasad iyo in laga faa'iidaysto, waana in jamaacooyinkii hore uga jiray dunida Islaamku ka koraan ku xisaabtanka xubnahooga oo kaliya, balse ay gacanta u fidiyaan aqlabiyada aamusan ee mujtamaca (الأغلبية الصامتة) *(the silent majority)*. Waana sida ka muuqata barnaamijka Abuu Ismaaciil oo soo jiitay qaybo fara badan oo ka mida mujtamaca Massarida, kuna qancay barnaamijkiisa ku astaysan dhaqan galinta shareecada, sugida amniga iyo cadaaladda, horemarinta dhaqaalaha iyo waxbarashada, la dagaalanka musuqmaasaqa iyo boobka hantida dadweynaha, isgarab taaga qadiyada caadilka ah ee shacabka Falastiin iyo in maxkamad sharciya la soo taago Xusni Mubaarak iyo xubnihii taliskiisii eey ku cadaato inay qayb ku lahaayeen dilkii, dhacii iyo burburkii dowladu kula kacday shacabka Masaarida sodonkii sano ee la soo dhaafay.

Inkastoo sida muuqataa tahay inuu Dr.Xaazim ka tirsan yahay itijaaha salafiga ah, haddana shacbiyadiisu iyaguun kuma koobna ee waxay gaadhay qaybo iyo noocyo kala duwan oo ka mida bulshada Massarida, xataa saakadan waxaan salaadii subux ka dib akhriyay fariin u soo diray Sheekh CabdulRaxmaan Cabdulkhaaliq oo ka mida culimada waaweyn ee itijaaha salafiga, inkastoo uu sheekhu ku nool yahay dalka Kuwayt haddana wuxuu muujiyay inuu taageersan yahay Abuu Ismaacil, wuxuuna ugu baaqay shacabka Masaarida inay doortaan isaga.

Waxaan odhan karnaa la tacaatufka uu helay Abuu Ismaaciil kuma koobna Masar dhexdeeda ee waxay saamaysay caalamka Carabta oo dhan, waayo waxa loo arkaa inuu yahay shakhsiyad ay dhab ka tahay dhaqan galinta shareecada, taana waxaad ka dhex daalacan karaa mashaakhiiyda fraha badan ee gacanta u taagtay sida Al-Xuweyni, Maxamed Yacquub, Xassaan, Mustafa Al-Cadawi, Wajdi Qunaym iyo kuwo kale oo badan. Taa waxa u dheer inuu barnaamijkiisu soo

jiitay sidaan sheegay mutacalimiinta iyo waxgaradka Masaarida iyo Carabta kaleba, taasina waxaad ka dhex arkaysaa internetka iyo haddii aad la sheekaysato waxgaradka Carabta ee ku nool Ameerika ee u qiiraysan barnaamijka Dr.Xaazim, Ilaahay ha xafidee.

Si kastaba ha ku dambeeyo mashruuca dowlada Islaamiga ee uu xambaarsan yahay Abuu Ismaaciil, ha la doorto ama yaan la doorane, haddana waxaan marnaba la dafiri karayn inuu muddo gaaban dhexdeeda kula fal galay mujtamaca Masaarida, daahana ka fayday wajiga foosha xun ee calmaaniyiinta iyo libiraaliyiinta colka la ah shareecada, bal ka daawo youtubeka muqaabalada uu saxafiga libiraaliga ah ee Camar Diib la yeeshay Dr.Xaazim. Waxaad arkaysaa in aanu Abuu Ismaaciil la gaban wuxuu ka aaminsan yahay xukunka Islaamka iyo waajibaadka madaxweynaha dowlada Islaamka, wuxuu meesha ka saaray hanaanka ku lifaaqan gabashada iyo war wareega eey ku dhaqmaan islaamiyiin badani marka wax laga weydiiyo shareecada iyo waajibaatka dowlada Islaamka, wuxuu muujiyay in gadhkiisa dheer iyo salafnimadiisu u diidayn inuu khabiir iyo aqoonyahan ku yahay dhaqaalaha, maamulka dowlada iyo siyaasadaha caalamiga ah.

Hadalkayga haddaan si toosa u sheego waxa weeyi dulucdiisu in aan leeyahay haddii jamaacooyinka Islaamigi si waaqiciya oo camalaysan uga qayb qaadan waayaan doonistan jamaahiiriga ah ee cirka isku shareertay kuna wajahan ku dhaqanka shareecada, waxay si tartiib tartiiba uga dhex bixi doonaan masraxa siyaasiga ah, waxayna ka hadhi doonaan cajalada wareegaysa ee isbedelada ka socda caalamka Islaamka, taasina marnaba macnaheedu maaha in Islaamkii ka baxay meesha, waayo Islaamku waa udub dhexaadka nolosha iyo humuumta Muslimiinta, laakiin cid kale iyo gacmo kale oo la jaan qaadi karta marxalada taagan , lehna barnaamij iyo mashruuc ka gudbi kara taxadiyaadka *(challenges)* taagan ayaa gacanta ku dhigi doonta mashruuca barakaysan ee dhisida dowlad Islaamiya oo suniya.

Arinbaa isna jira looga fadhiyo inay islaamiyiintu fiiro gaara siiyaan, kaasina wuxuu yahay inay ka fogaadaan aragtida ay qaateen Sheekh Raashid Al-Qanuushi iyo ururkiisa Al-Nahda oo helay aqlabiyada doorashooyinka dalka Tuunis. Aragtida siyaasiga ah iyo nahjiga ay Al-Nahda ku dhaqmaysaa waxay afgambi ku tahay mashruuca dhabta ah ee ku dhaqanka shareecada.

Waxay *Nahdiyiintu* diideen in distuurka cusub lagu daro qodob odhanaya “shareecadu waa masdarka asaasiga ah ee tashriica Tuunis” iyagoo ku kaaftoomaya qodob ku qornaa distoorkii dalka loo dejiyay sanadkii 1956 oo odhanaya “ Tuunis waa dowlad xora oo madax banaan, Islaamku waa diinteeda, carabigu waa afkeeda, jamhuuriguna waa nidaamkeeda”.

Arinkani wuxuu keenay in tobanaan kun oo reer Tuunisi ka mudaaharaadaan diidmada *Nahdiyiinta*, iyagoo dalbaya in distuurka cusub lagu daro qodob si cad u tibaaxaya una sheegaya ku dhaqanka shareecada [Islamtoday.net].

Qodobka *Nahdiyiintu* diideen laftiisu maaha mid si qayaxan oo cad u sheegaya in distoorka dowladu yahay shareecada oo kaliya. Waxa saxa in qodobkaa loo qoro sidan "Shareecada Islaamka ayaa ah meesha kaliya ee laga soo xiganayo axkaamta iyo qawaaniinta". Haddii la yidhaahdo shareecada Islaamku waa masdarka asaasiga ah (المصدر الأساسي) amaba sida ku taala distoorada qaarkood waa masdarka koowaad (المصدر الرئيسي) ee tashriica, labaduba waxay sheegayaan in ay jiraan ilo kale oo iyagana laga soo xigan karo sharciga, axkaamta iyo qawaaniinta dowlada lagu xukumo, taasina waa xaaraan oo ma banaana.

Xalay ayaa anigoo daalacanaya internetka ayaa waxaan arkay tacliiq af Soomaali ku qoran, oo qofkii qoray ku diidayo shareecada Islaamka, wuxuu tibaaxay in aan shareecada laysku xukumi kareen, sababtuna ay tahay sidaan hadalkiisa ka fahmay in aanay shareecadu inoo dhigin hanaan ku aadan maamulka iyo qaabka agaasinka ee dowlada Islaamku ku hagayso dowlada.

Waxa cad in Islaamku aano diidayn tajaaribta caqliga aadanahu keenay, lana falgaliyay ee la arkay waxtarkooda. Maantana wax heer sare oo cilmiyaysan laga gaadhay culuunta maamulka iyo agaasinka sida "*management styles, management skills, organizational theory, Public administration*", shareecaduna isma hortaagayso in laga faa'iidaysto tajaaribtaa oo dhan iyo in lagu dhaqan geliyo dowlada Islaamka. Hase yeeshee waa inay waafaqdo *masaalixda mursalka ah, qawaacidda guud ee sharciga, qiyaaska saxiixa ah iyo maqaasida diinta.*

Waxaan kaloo uga digaynaa jamaacooyinka islaamiga ah inay gacan saar la yeeshaan inta ka hadhay talisyada daaquudka ee qaarkood wali ka taliyaan qaybo ka mida dalalkeena. Xarakaadka islaamiga ah, culimadooda iyo hogaankoodaba waxa maanta hor yaala imtixaan adag oo loo baahan yahay inay kaga gudbaan isgarab taag ay isgarab taagayaan qadiyadaha caadilka ah ee shucuubta dunida Islaamku higsanayso, hana ugu horayso qadiyada shareecada oo ah mid haddii lagu dhaqmo lagu helayo raalida Rabi, barwaaqo, amni iyo horumar aduunka lagu helo iyo waliba ilaalinta xuquuqda qof walba oo ku hoos nool xukunka shareecada.

Reer Galbeedka:

Reer Galbeedka waxaan ku leeyahay ha ka hor imanina doonista iyo rabitaanka shucuubta dunida Islaamka ee diintoodu ku waajibisay, dadweynaha Muslinku iyagaa maanta qaatay khiyaarka shareecada oo ah waajib diiniya oo ku salaysan caqiidada iyo diinta Islaamka, ayagaana doonaya in diinta Islaamku noqoto qaanuunka lagu xukumo dadkooda iyo dalalkoodaba.

Joojiya siyaasadda laba wajiilaha ah, oo Muslimiinta ha kula dhaqmina waxa soomaalidu ku magacowdo "la jiifiyaana banaan", idinkuna ku sheegtaan falsafada siyaasiga ee*(Machiavellism*). Haddii bulshooyinkiinu xaq u leeyihiin in sharci u samaystaan wixii ay doortaan iyagu, taasina distoor iyo qaanuun u tahay dalka iyo dadkaba, maxaad hadaba qiyamkiina u afgambiyaysaan markay arintu la xidhiidho Muslimiinta. Bal dood ahaana, miyayna xataa dimuqraadiyadiinu dhigayn inaad ixtiraamtaan doonsita shucuubta? Waa yaabe,

dimuqraadiyadiinu soo laba wajiile maaha?! Waxaad tidhaahdaan wada noolaansho ku salaysan nabad waxa keeni kara Isfahan, ee bal fahma in xukunka shareecadu ka sareeyo xataa doonista shacabka, xataa in loo codeeyo ayaan meesha ku jirin, waayo diinta Islaamka ee Muslimiintu aaminsanyihiin ayaa dhigaysa In Ilaahay kaligii iska leeyahay xaqa sharci dejinta, waa xaq aan madaxda dowlada, baarlamaanka iyo goloyaasha shacabku midna wax ku lahayn, shaqada laamaha dowladuna waxay ku kooban tahay fulinta iyo ilaalinta sharciga Islaamka. Waxa intaa dheer in dowlada lafteedu waayayso awoodeedii dowladnimo haddii ay isku daydo inay xayirto xukunka shareecada ama ay ka hor timaado caqiidada iyo diinta Islaamka.

Ha u adeegsanina Qaramada Midoobay, ururada ka farcamay iyo shirarka aad ku magacowdaan Shirar caalamiya eed kaga hadashaan qadiyadaha dumarka, xeerarka qoyska, xuquuqda aadamaha, xoriyatul qowlka oo intaba aad ku qeexdaan sharax waafaqsan taariikhdiina dhaqankiina, aragtidiina iyo qiyamkiina; inaad ku hujuumtaan kuna fara galisaan axkaamta shareecada Islaamka kuna af gambidaan doonista dadweynaha Muslinka. Sidoo kale ka waantooba inaad u isticmaashaan ilaha dhaqaalihiina sida Bangiga Aduunka iyo IMF ta iyo ururada gargaarka *(relief organizations)* cadaadis siyaasiya *(Political pressure)* ood ku xaqiijisaan siyaasadihiina ku wajahan is hor taaga shareecada iyo xukunka Islaamka.

(أَفَحُكْمَ الْجَاهِلِيَّةِ يَبْغُونَ وَمَنْ أَحْسَنُ مِنَ اللّهِ حُكْماً لِّقَوْمٍ يُوقِنُونَ) [المائدة:50]

(Ma Xukunka Jaahiliyada ayay doonayaan, yaa uga fiican Ilaahay xukunkiisa qoom wax yaqiinsan) [Al-Maa'idah:50]

Halgan.net

Wabillaahi towfiiq.

W/Q:- Sh Maxamed Sh.CabdiRaxmaan Kaariye